


Waxa Loo sunneeyaa qofka doona in uu tukado in uu ku daba tukado imaamka, hadii uu kali u tukanayana in uu utukado dhanka sutrada. Sutradda imaamkuna waa sutrada cidda ka danbeysa.




Waxa uu ka yeelayaa aragiisa halka uu sujuuda uu saarayo mana daymoonayo hereeraha.






1

Waxa uu ka yeelayaa labadiisa lugood inta u dhaxeeysa sida labadiisa garab oo kale kama siyaadinayo kamana nuqsaminmaayo.









2

Marka uu la yimaado shuruuda salaada kadib wuxuu oranayaa (Allaahu akbar) isagoo gacmaha kor uqaadaya isla markaana isku uruurinaya gacmaha lana simaya dacasha dhagtiisa ama labadiisa garab baabacadana waxa uu ka yeelayaa dhanka qiblada



3

intaa dabadeed wuxuu ka yeelayaa kafiisa midig baabacadiisa mid ka sareeya kafka baabacadiisa bidix laabtiisa dushiisa.



4

intaa Dabadeed waxa la suneeyaa in uu akhriyo ducada furfurashada salaada rakcada hore oo kaliya, waxa mudan in uu kala badbadalo ducooyinka ku soo arooray furfurashada salaada, oo uu yidhaahdo







ka dib waxa uu iska naaraya shaydaanak sida ku soo aroortay oo ah

adib wuxuu akhrinayaa faatixada isagoo kala dhigdhigaya oo kala habaynaya kalimaadkeeda iyo xuruufteeda iyo xarakaadkeeda

Kadib waxa uu akhrinayaa wixii uga fududaada aayaadka qur'aanka ee kale, waxa sunnaa in aanuu acuudiga akhrin kuna bilaabo uun suuradaha bilowgooda.

5

Kadib wuxuu kor uqaadaya gacmihiisa sidii takbiiratu ixraamba uu kor uqaaday isagoo oranaya, waanaa rukuucaya, waxaanuu qabsanaya jilibkiisa waxaanuu ka yeelayaa dhabarkiisa mid la siman madaxiisa waxaanuu oranaya iyadoo waajib ku ah





6

Kadib markuu kacayo kasoo tooskana ka horeeyabin uu yidhaahdo, isagoo gacmiisa kor uqaadaya lana simaya garabkiisa.



Markuu ka soo toosana wuxuu oranayaa, Waxa Loo sunneeyaa in uu ka siyaadiyo inta soo aroortay.

Kadib waa takbiiranaya isaga on kor uqaadayn gacmihiisa waxaanuu ka sujuudayaa xubnaha todobada ah, wajiga sankaa, baabacad kafka, iyo labada jilib, iyo faraha baabacadooda.






7

Waa kala fogaynayaa laba kililo iyo caloosha iyo jilbaha iyo sidoo kale jilbka iyo dhudhumada korbaanuu uga qaadaya labadiisa dhudhun dhulka, iyadoo la waajibinayo waxa usunnay in uu ka siyaadiyo intavku soo aroortay waxa kaloo la gudboon in uu ku ducaysto wixii uu jeclaado, waxaanaa sii mudan in uu ku ducaysto ducooyinka soo arooray.






8

Kadib waa takbiiranaya waxaanuu ku fadhiisanaya lugtiisa bidix isagoo goglanaya waanaa taagayaa ta midig, wuxuu ka yeelayaa halka hoose ee faraha mid dhanka dhulka u jeeda, farahana wuxuu u jeedinayaa dhanka qiblada, baabacadana wuxuu ka yeelayaa halka udanbeeysa bawyadiisa, Waxaanuu oranayaa in uu ka yeelo lugtiisa bidix



9

Fadhiga noocaasa ayuu ufadhiisanaya sida illaa ta sadexaad iyo afraad mooyee ee ataxasdkan danbe taa wuxuu la imanayaa qaabka tawarruka oo ah mid ka sareeysa dhudhunkiisa midig



Marka uu ka faaruqo sujuuda labaad wuxuu u fadhiisanayaa attaxyaadka.

Waxaanuu ishaarayaa fartiisa musabixada ee murdisada, waanaa laabayaa ta dhexe iyo faryarada, waa dhaqaajinayaa isagoo baryaya ilaahay.

التحيات لله، والصلوات والطيبات، السلام عليك أيها النبي ورحمة الله وبركاته، السلام علينا وعلى عباد الله الصالحين، أشهد أن لا إله إلا الله، وأشهد أن محمدًا عبده ورسوله، اللهم صل على محمد وعلى آل محمد، كما صليت على إبراهيم وعلى آل إبراهيم؛ إنك حميد مجيد، اللهم بارك على محمد وعلى آل محمد كما باركت على إبراهيم وعلى آل إبراهيم؛ إنك حميد مجيد.

Kadib ilaahay ayuu ka Magan galayaa afar arin iasagoo oranaya




اللهم إني أعوذ بك من عذاب جهنم، وأعوذ بك من عذاب القبر، وأعوذ بك من فتنة الدجال، وأعوذ بك من فتنة المحيا والممات

Kadib wuxuu alle ku baryayaa wixii uu jeclaado waxaanaa mudan inta soo aroortay in uu alle ku baryo Isagoo oranaya

اللهم أعني على ذكرك وشكرك وحسن عبادتك

Kadib waa salaama naqsanayaa laba salaam naqsi midigtiisa kadib bidixdiisa waxaanuu oranayaa

«السلام عليكم ورحمة الله»



10

Waxa diyaariyay Dr hathim sarhan oo ah bare wax kadhiga masjidka nabiga mushrifna ka ah machad sunne

: mahadsunnah.com »

in la daabaco oo la faafiyaa oo la qaybiyaa waa mid furan.

